


### Guriga dhexdiisa

- Meelaha uu cunuggu gaaro waa in laga fogeeyaa:
  - daawooyinka iyo fitamiinnada
  - kiimikooyinka iyo maaddoooyinka wax lagu nadiiifyo
  - taraqa iyo qaraxadaha
  - aalkolada iyo maandooriyayaasha kale.
  - sigaarka, shiikada iyo waxyaabaha nikotiinka beddela
- Maddooyinka dhaqista iyo nadaafadda iyo kiimikooyinka kale waxaa lagu keydiyaa weelashooda asalka ah.
- Dhir dheriyeedka guryaha lagu koriyo sun ma lahan.
- Jaranjarooyinka guduuhu waxay leeyihiin:
  - taraarax-celiyeaal
  - xeyndaabyo ay dhinacyadoodu toosan yihiin si flicanna isugu dhowyihiin.
- Wadajir ayaa loo baranayaa sida jaranjarooyinka loogu socdo, jaranjarooyinka laguma ordo mana lagu ciyaaro.
- Dabaq kasta wuxuu leeyahay ugu yaraan hal dabsheege oo shaqeeynaya, kaas oo loogu talagalay 60ki mitir ee labajibbaaran. Bil kasta ayaa la koontaroolaa shaqada dabsheegaha.
- Godadka bareeska korontadu waxay leeyihiin ammaan ilaaliye ama waxaa lagu ilaaliyay aabbur.
- Fiirooyinka korontada waa la xiray waana ka fog yihiin meelaha uu cunuggu gaaro, doobiyo bareesyada boorka waa laga nadiiifyay mana isku xiriirsana.

- Daaqaduhu waxay leeyihiin xajiyeyaasha daaqada ee dhicitaanka ka hortaga daaqaduhuna waa kuwa inta badan xiran.
- Roogagga hoostooda waxaa ku jira taraarax-celiyeaal.
- Albaabka musquusha iyo musquusha qubeysku waxay leeyihiin quful bannaanka laga furi karo.
- Tubbooyinka waa tubbooyin ah kulsime iyo ammaan.
- Sagxadda iyo waaskada musquusha qubeysku waxay leeyihiin taraarax-celiyeaal.
- Waaskada qubeyska iyo tan xumbeysana markasta waa la faarujiyya isticmaalka kaddib fuustada/haanta qubeyskana waa la daboolaa.
- Burjikada sawnada waxaa ku wareegsan xeyndaabka ammaan mana ahan in dharka lagu qallajiyo burjikada kulul agteeda.
- Xaaladda qalabka korontada ku shaqeeyaa ee guriga sida nalalka waa la hubiyay waana kuwa ammaan ah (waxaa ku qoran calaamadda CE).
- Mindiyaha afeysan iyo ableeyada iyo qalabka kale ee shaqada waxaa lagu hayaa meel uusan cunuggu gaarin.
- Wax ku qabashada dabka, isticmaalka qalabka guriga ee korontada ku shaqeeyaa, minidiyaha iyo qalabka shaqada waxaa lala baranayaa qof weyn.
- Cunugga waxaa lagu adkaynaa in uu xirfadaha cusub barto marka uu qof weyn la joogo.

### Ardaaga

- Qalabka ardaaga ee lagu ciyaaro sida wiifowga iyo biraha la fuulo waa kuwa ammaan ah xaaladdoodana si joogto ayaa loo koontaroolaa.
- Goobta ay caruurta ku ciyaaraan waa mid ka dugsoon gaadiidka iyo kulka qorrxada.
- Cunugga waxaa qorraxda looga ilaalinaya dhar ku habboon, iyadoo laga fekerayo Aadista bannaanka iyo kareemka qorraxda.
- Cunuggu wuxuu xiranyahay dhar aan qalabka ciyaarta ku dhageyn (tusaale ahaan madax gashigu ma lahan dun ama tiidic).
- Qofba mar ayuu taraamboliinka ku boodbooda waxaana taraamboliinka ku wareegsan shabaq ammaan.
- Cunugga waxaa lagula heshiiyay meelaha uu ku dhaqdhaqaaci karo marka u bannaanka aadayo.
- Cunuggu wuxuu isticmaalayaa agabka badbaadada ku habboob dhammaan noocyada ciyaarahaa (tusaale baraf ku dul taraarixidda, daaddegitaanka buuraha barafka, baaskiil wadista, looxad-shaag ku taraarixidda).
- Koofida baaskiilkaa waa la iska bixinayaa isticmaalka kaddib, kahor inta aan ciyaarahaa loo wareegin.
- Fuustada qubeyska/haanta qubeyska iyo weelasha kale ee biyaha/waaskooyinka waa la daboolaa isticmaalka kaddib.



# Ammaanka cunuggaada

## LIISKA HUBINTA EE 4- 6 SANO JIRYADA

Khabbiirka shilka ee arrimahan halkan ku jira waa Ulla Korpilahti, agaasimaha horumarinta, Hay'adda caafimaadka iyp nololwanaagga Barnaamijka ammaanka ee carruurta iyo dhallinyarada: [thl.fi/lastenturvallisuusohjelma](http://thl.fi/lastenturvallisuusohjelma)  
Sawir-gacmeedka waxaa sameeyay Antti Metsäranta

Wadajir u barta u kuurgelidda iyo aqoonsashada meelaha halista ah. Ka fekera habab ammaan ah oo wax loo qabto marka lagu jiro xaaladaha halista iyo sigashada ah.

### Gaadiidka dhexdiisa

- Cunugga uu dhirirkiisu ka yaryayah 135 sentimitir marwalba wuxuu ku safrayaa baabuurta suunka ammaanka ee kirisga ku xiran: suunka kursiga ammaanku wuxuu xittaa ka ilaalinayaah dhinacyada waana mid ka wanaagsan kan fadhiga lagu dheeereeyo.
- Marka ay baaskiilkka wadaan waxay cunugga iyo qofka weynba isticmaalaayaan koofida baaskiilkka oo si munaasab ah loo xiray.
- Bidhaanto ayaa dharka iyo koofida baaskiika ee cunugga ku jira. Haddii loo baahdhan waxaa araggaa lagu kordhinayaah funaanadda bidhaantada.
- Nal ayaa baaskiilkka loo isticmaalaayaah marka mugdi ama gudcur lagu dhix wadayo.
- Cunugga waxaa la barayaa sida ammaanka ah ee waddooyinka gaadiidka loogu socdo qofka weynayaanaa tusaale wanaagsan u noqonaya.
- Deegaanka dadku degganyahay wuxuu leeyahay xadka xawaarahaa oo hooseeya.

### Biyaha dhexdooda

- Cunugga iyo dadka waaweyn markasta oo ay biyaha dhexmarayaan waxay isticmaalaayaan jaakadaha badbaadada.
- Cunugga markasta waa lagu ilaalinayaah agagaarka biyaha: qalabka biyaha ku dul sabbeeyaa iyo alaabaha dabbaasho ma ahan qalab ammaan.
- Cunugga waxaa biyaha lagu barayaa islamarkaasa lagu qabadsaniinayaah qaab ciyaar ah iyadoo la adeegsanayo.

Dhulka fariiso kaddibna indhaha cunugga ku fiiri waxa aad arkeyso: maxaa xiiso leh oo uu cunuggu gaari karaa?

### Gargaarka degdegga ah

- Telefoonka gacanta waxaa lagu keydiyay:
  - lambarka gurmadka degdegga ah 112 ama
  - ablikeeshinka 112 Finland, haddii telefoon casri ah la isticmaalyo
  - lambarka lacag la'aanta ah ee Xarunta aqoonta summoobidda 0800 147 111 (24h/afar iyo labaatanka saac)
- Marka xaalad halis ah jirto cunuggu wuu yaqaanaa in uu dadka waaweyn caawimaad ka codso wuuna yaqaanaa in uu waco lambarka gurmadka degdegga ah ee 112.
- Ku filnaanshaha qalabka gargaarka degdegga ah ee guriga waa la xaqiijiyay (caawimaad waxaa laga helayaa farmashiyaahama rugta latalinta).

### ARRIMAHAA KALE

- Cunugga waa lagula heshiiyay nidaamka guud ee la xiriira isticmaalka warbaahinta (taabletka, telefoonka casriga ah, telefishinka, ciyaaraha).
- Cunugga waxaa la baray isticmaalka ammaanka ah ee internetka waxaana loo sheegay waxyaabaha la sameeyo haddii uu kula kulmo wax qashqashaad ku ah.
- Cunugga waxaa lagu dhiirigelinyaa in uu dhaqdhaqaako waxaana la barayaa xirfadaha ammaanka: sida wadista baaskiilkka, sharciyada waddooyinka gaadiidka.
- Meelaha uu cunuggu aadayo iyo meelaha uu joogaba guriga waa laga ogyahay wadajir ayaan looga heshiiyay.

- Marka la joogo munaasabadaha kala duwan waxaa cunugga ammaankiisa sare u qaadaya jijin ay ku qoran yihiin magaca cunugga iyo macluumaadka xiriirkka waalidka oo cunugga loo xiro.
- Cunugga waxaa la barayaa in uu maanka ku hayo ka fekeridda ammaankiisa iyo kan dadka kale.
- Cunugga waa la dhegeystaa dhegeyso dareenka iyo aragtiyada cunuggana waa la xiiseynayaah.
- Cunugga waxaa loo aqbalayaa sida uu yahay waxaana la korinayaah iyada oo la dhiirigelinyo.
- Cunuggu wuxuu si ammaan ah qoyska dhediisa ugu raaxaysan karaa kalgacalka, wehelka iyo wadjirka.



People only have one life  
KOTITAPATURMA.FI



Mas'uulka cunugga iyo elhelkiisow,

ku dadaal awooddaada oo welwelkaada kala hadal asxaabtaada iyo/ama tusaale ahaan rugta latalinta.

Fiiro u yeelo isticmaalkaada warbaahinta iyo qalabka casriga ah marka uu cunuggu kula joogo.

Haddii aad internetka ku aragto macluumaad ama wadahadal aan habbooneyn waxaad arrinta ogeysiin kartaa tusaale ahaan booliska: [poliisi.fi/nettivinkki](http://poliisi.fi/nettivinkki)

Haddii aad ammaan daro ama dagaal dareento, la xiriir lambarka gurmadka degdegga ah 112 ama telefoonada kale ee dadka caawiya marka lagu jiro xaalado aan degdeg ahayn tusaale ahaan Nollalinja 080 005 005 ama lambarka xasaradda ee Ururka caafimaadka dhimirkka Finland 010 195 202.

Baro xirfadaha gargaarka degdegga ah kuna dadaal sida ay qalabka gargaarka degdegga ah ee guriga ay wakhtiga ula socdaan! Wakhtiga in wax la qabto ay tahay waxay noqon karaan wakhti yar, markaasna waa muhiim in la ogyahay waxa la sameynayo.

Meesha uu qofka weyni maro kan yar waa u furdug! Xusuusnow, in barashada habdhaqanku uu yaraanta ku billowdo.